

Ilaali Maalgelinta Muhiimka ah ee Tacliinta Sare Deeqda Waxbarasho ee loogu talagalay Macalimiinta Waxbarashada Hore ee Daryeelka Carruurta Saameynta Tacliinta Sare ee Barnaamijyada Daryeelka Carruurta & Waxbarashada Hore ee Washington

Deeqda Waxbarasho ee Barnaamijka Child Care Aware ee Washington waxay caawineysay macalimiinta carruurta ee gobolkayaga taas oo kobcinaysay nolasha carruurta iyo qoysaska muddo ku dhow 20 sano. Kuwa ka qalanjebiyey deeqda waxbarasho waxay wanaajiyaan waxbaritaankooda iyo bixinta daryeelka iyagoo isticmaalaya aqoonta iyo dhaqamada ugu wanaagsan ee horumarinta waxbarashada carruurnimada hore. Intaa waxaa sii dheer, deeqaha waxbarasho waxay gacan ka geystaan xaqiijinta in daryeelka carruurta iyo xirfadleyda waxbarashadda hore ee Washington ay helaan cadeymaha ay ugu baahan yihiin inay buuxiyaan shuruudaha helitaanka shatiga gobolka.



986

CCA ee
Aqoonyahannada
WA



24,256

Carruurta ay
daryeelaan CCA ee
Aqoonyahannada
WA



24,375

College Credits



469

Dhamaystirka
Darajooyinka &
Shahaadada



\$5,844,085

Lacagaha Deeqda
Waxbarasho ee La
Bixiyey



47

Kulliyadaha ku yaal
WA oo ay we-
heliyaan CCA ee
Aqoonyahannada WA

Marka dhallaanka iyo carruurta yaryar ee ku jira daryeelka carruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore ay daryeel ka helaan xirfadlayaal xirfad sare iyo naxariis leh, waxay heli karaan waxbarashada carruurnimada hore ee muhiimka ah ee ay u baahan yihiin si ay aasaas adag ugu yeeshaan dhammaan waxbarashadooda mustaqbalka. Kuwa ka soo qalanjebiyey Barnaamijka Child Care Aware ee Washington waxay aasaasiyada ugu wanaagsan ee cilmi-baarista caruurnimada hore ugu lifaaqaan fasaladooda, iyagoo waxbarashada ku salaysan cayaarta ku soo daraya noolasha maalin kasta ah.

Kuwa hela deeqda waxbarasho iyo kuwa ka qalin jabiya waxay ka faa'iideystaan kasbashada shahaadooyinkooda tacliinta sare iyadoo isticmaalaya kalsooni iyo xirfado xoogan oo ay ka helaan noocyada kala duwan ee waxbarashada, oo ay ku jiraan akhriska iyo qorista, iyo la xiriirka qoysaska iyo shaqaalaha. Qaar badan oo ka mid ah kuweena qalin-jabiyay waxay jagooyin hoggaamineed ka qabteen barnaamijyadooda iyo ururada xirfadleyda carruurnimada hore ee ka wada shaqeeya hagaajinta nolasha carruurta iyo qoysaska.



Barnaamijka Child Care Aware ee Washington wuxuu sharci dejiyayaasha ugu baaqayaa inay mudnaanta siiyaan daryeelka carruurta ayna ilaaliyaan maalgashiga muhiimka ah ee la geliyo deeqaha waxbarasho ee tacliinta sare ee nidaamkayaga waxbarashada hore ku tiirsan tahay.

Xogtu waxay ka imaanaysaa Luulyo 2016 ilaa iyo hadda.